

Family ID Number: _____ Participant Name(s): _____

Xaquuqda iyo Waajibaadka WIC

Waxaan doonaynaa inaan xaqiijino inaad fahantay xaquuqda iyo waajibaadka kaqaybgalaha WIC. Xaquuqda iyo waajibaadka WIC waxay ku saabsan yihiin Manaafacaadka WIC ee Farmers Market Nutrition Program (Barnaamijka Nafaqada ee Beeraleeyda ama FMNP). Xaquuqaha iyo waajibaadka FMNP waxaa ka mida oo aysan ku koobneyn, in ay si leh xushmad iyo ixtiraam ula dhaqmaan macaamiisha wax ka iibsanaaya ee FMNP, iyo adeegsiga, iyo sida ay kuugu sheegayaan manfaca suuqa beraleeyda shaqaalaha WIC.

Xaquuqdayda

- **Cuntooyinka WIC:** Haddii aan uqalmo WIC, waxaan soo qaadan doonaa kaarka eWIC si aan ugu iibsado cuntooyin caafimaad leh. WIC waxay bixisaa qaar, laakiin maaha dhamaan, kamid ah cuntooyinka kuhabboon baahiyaha kaqaybgale kasta.
- **Macluumaadka nafaqada:** Waxaan macluumaad kaheli doonaa cuntada caafimaadka leh iyo noloshu firfircoon.
- **Taageerada naas-nuujinta:** WIC ayaa iga taageeri doonta igana caawin doonta naas-nuujinta.
- **Macluumaadka daryeelka caafimaadka:** Waxaan macluumaad kaheli doonaa talaalada, helitaanka daryeel caafimaad, iyo adeegyada kale ee aan xiisaha uqabi karo.
- **Dhaqan wanaagsan:** Xeerarka adeegsiga WIC waa kuwo ay dadka dhan usiman yihiin. Waxaan codsan karaa Dhagysi Cadaalad ah (Fair Hearing) haddii qof iisheego inaan heli karin adeegga WIC aanana kuqancin.
- **Qadarin guud:** WIC iyo shaqaalaha bakhaarku waxay igula dhaqmayaan si qadarin iyo xushmad kujirto. Waan usheegi karaa shaqalaha WIC haddii aan si qadarin leh la ila dhaqmin.
- **Macluumaadka wareejinta:** Waxaan u wareejisan karaa adeegyada WIC xarun kale oo caafimaad. Waxaan codsan karaa waraaqda wareejinta.
- **WIC Nutrition Program cidna matakoro:**

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo sharciyada iyo qaynuunada xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salysan isirka, midabka, asalka qaran, jinsiga, (oo ay ku jiraan, aqoonsiga jinsiga iyo nooca jinsiga), naafonimada, da'da, ama aargoosiga ama aargudashada hawlo hore oo xuquuqaha madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, Hab qoraaleedka camoolaha, daabicidda farta waaweyn, cajalada maqalka, Luuqadda Dhagoolka ee Maraykanka), waa inay kala xidhiidhaan Hay'adda Gobalka ama deegaanka ee mas'uulka ka ah maamulka barnaamijka ama xarunta TARGET ee USDA lambarka (202) 720-2600 (cod iyo TTY) ama waa inay la xidhiidhaan USDA iyaga oo u maraya Federal Relay Service (Adeegga Dadka Dhagaha la' ee Federaalka) ee lambarka (800) 877-8339.

Si loo gudbiyo dacwada takoorka ee barnaamijka, Dacwad-qabaha waa inuu buuxiyo Foomka AD-3027, Foomka Dacwada Takoorka Barnaamijka ee USDA kaas oo onleen ahaan looga heli karo barta: <https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf>, xafiis kasta oo USDA ay leedahay, iyada oo la wacayo (866) 632-9992, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa inay leedahay magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka ee dacwad-qabaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee la soo eedeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqaha madaniga ah ee la soo eedeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in loogu diraa USDA;

- (1) **boostada:**
U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410; ama
- (2) **fakiska:**
(833) 256-1665 ama (202) 690-7442; ama
- (3) **iimaylka:**
program.intake@usda.gov

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.

Macluumaadka Wadaaga ah

Macluumaadkaaga waxaa lala wadaagi karaa:

- Barnaamijyada kale ee WIC haddii aad xarun kale uwareegto.
- **Barnaamijyada kale ee dawlada kuwaasoo kucaawin kara. Waxaad codsan kartaa in lagu tuso liiska barnaamijyadaan.**
- Sida sharcigu doonaayo.

Waajibaadkayga

Waxaan ogolaanayaa inaan bixiyo macluumaadka runta ah ee dhamaystiran oo kusaabsan:

- Aqoonsigayga, xaalada uurkayga, xaalada naas-nuujintayda, ciwaankayga, iyo nambarka taleefankayga.
- Dhaqaalaha soo gala qoyskayga.
- Tirada dadka kunool gurigayga.
- Inaad kujirto barnaamijyada Medicaid, FoodShare (food stamps), TANF (Temporary Assistance to Needy Families), ama FDPIR (Food Distribution Program on Indian Reservations).

Waxaan ogolaanayaa inaan raaco xeerarka hoos kuqoran. Waxaan:

- Gunooyinka kaqaadanayaa kaliya hal xarun caafimaad oo katirsan WIC bilkasta.
- Waxaan usoo sheegayaa kaarka iga lumay ama la iga xado ee eWIC ama WIC bamka caanaha naaska WIC shaqaalaha.
- Waxaan xaqiijinayaa in qofkasta oo aan umagacaabo inuu adeegsado kaarkayga eWIC uu yaqaano xeerarka WIC. Waxaan bari doonaa qofka sida loo adeegsado kaarkayga eWIC si sax ah.
- Waxaan dhawrayaa balamahayga WIC ama waxaan wacayaa xarunta caafimaadka si aan dib jadwal kale ugu qabsado.
- Waxaan u adeegsanayaa cuntooyinka WIC iyo caanaha ilmaha kaliya qofka kujira WIC waxaana xaqiijinayaa in cuntadu ay gaarto qofka kujira WIC markay ay jirto masuuliyad wadareed, uu yahay ilmo cid kale korinayso, iwm.
- **Ma iibin doono, cidna masiin doono, ama kaarkayga eWIC masiin doono cidkale, cuntooyinka iyo caanaha WIC, ama bamka naaska.** Haddii aan haysato alaabaha WIC oo aanan isticmaali karin, waxaan ku celinayaa xarunta caafimaadka.
- Kuma ganacsan dono/cidna wax ugama badelanaayo ama ugama ceshanaayo kaarkayga eWIC, cuntooyinka ama caanaha WIC, ama bamka naasaha caanaha si la iigu badelo lacag, dayn, jeegaga roobka, ama alaabo kale.
- **Inaan soo galin waxyaabaha ay WIC leedahay aalada interneetka.**
- Inaan raaco tilmaamaha kuqoran Tasmada Adeeggashada ee WIC.
- Inaan kudhaaran, kuqaylin, dhibaataayn, uhanjabin ama jir ahaan nabar ugaysan shaqaalaha WIC ama bakhaarka.
- Inaan dhamaystirin wareejinta lacagtayda, marka laga reebo inaan baraha adeegga shaqsiga ah kabixinaayo, hadaan ushaqeeyo bakhaar aqoonsi kahaysta WIC.

Heshiiska: Waxaa qasab ah inaan aqbaloo in alaabahaan ay kujiraan WIC:

- Dhamaan macluumaadka aan siisay WIC waa run. Waxaan usheegayaa shaqaalaha WIC islamarkaba haddii ay jiraan wax isbadalo ah.
- WIC waxay xaqiijin kartaa tirada qoyskayga iyo dhamaan ilaha dhaqaalaha soogala qoyskayga.
- Haddii aan jabiyo WIC xeerarka, anigga, ama cunugayga, waa laga saari karaa WIC.
- Haddii aan been sheego si aan uhelo cuntooyinka WIC ama aan soo celin waayo bamka naasaha oo la idaymiyay, waxaa laga dalban karaa inaan dib usiiyo WIC qiimaha kaashka ah ee alaabahaan.
- WIC waa barnamij kaalmo oo federaal ah. Haddii aan jabiyo xeerarka WIC, waxaa lay marsiin karaa dacwad danbi ama madani ah si waafaqsan sharciga gobalka iyo kan federaalka.

Waxaan akhristay foomka, ama shaqaalaha WIC ayaa aniga ii akhriyey foomka. Waxaan fahmay oo aan oggolaaday sharciyada iyo heshiiska kore, oo waxaa la i siiyey koobbi ah xaquuqda iyo waajibaadka Habka libsashada ee WIC.

SAXIIXA – Kaqaybgale/Waalidka/Masuulka/Daryeele

Taariikhda La Saxiixay